



Xaqqa Guryaha ee Dadka Waaweyn ee Naafada ah

Fair Housing for Older adults with Disabilities

Sharciyada Xaqqa Guryaha Macnaheedu *waa u Sinaanta* Guryaha

Sharciyada xaqqa guryahu waxa ay ka ilaaliyaan dadka takoorida la xiriirta guryaha. Sharcigu waa uu ku ilaalin kolka aad guri doonka tahay waxaa kale oo uu kaa ilaalin in aan si aan sinaan ahayn laguula dhaqmo kolka aad guri ku nooshahay. Eeg warqadayada xogta aruursan ee [Heyb Sooca Guryaha](#) wixii akhbaar kale ee aasaasi ah ee ku saabsan guryaha. Warqadan xogta aruursan ahi waxaa iska leh dadka waaweyn ee naafada ah ee aaminsan inay ku sameeyeen takoor ama ay hadda ku hayaan takoorid qolada guryaha ay uga jiraan.

Ciddee xaq u leh in loo aqoonsado naafo?

Qofka waxaa loo tixgeliyaa naafo hadii:

- aad leeyahay iin jireed ama maskaxiyan ah oo si weyn u xadidida mid ka mid ah hawlaha waaweyn ee waxqabsiga nolosha
- aad tahay qof dadka kale ay u arkaan inuu leeyahay iin xadidida
- aad leedahay taariikh ama diiwaangelin ku saabsan iin

Sharciga dadka waaweyn ee naafadaha ah ma ilaaliyaan dhamaan xaquuqda noocyada guryaha ah oo dhan?

Sharciga xaqqa guryaha waxaa uu ilaaliyaa dadka weeweyn ee naafada ah ee ku nool ama codsada inay ku noolaadaan:

- guraya kali-kali ah, guraha la wada gato, guryaha isku dhagan iyo kuwa da-wadaagta ah
- guryaha haynta
- gargaarida nolosha / guryaha adeega leh
- rugaha daryeelada joogtada ah
- dadka waaweyn / guryaha waayeelka
- Guryaha saraha dadka da'aha isku qasan ah
- Beelaha guryaha barxadaha la dhigto
- iyo goobo kale



Sharciyada xaqqa guryahu waxa ay quseeyaan kiraystayaasha **iy**o guryo gatayaasha – laakiin ilaalinta qaarkeed waa ay quseeyaan mid uun ama mida kale.

Sidoo kale waxaa jira xaalado aysan ahayn inay u hogaansaman iska xeerarka. Sida:

- hadii aad ku nooshahay guri uu leeyahay urur samafal ahi, waxa ay lahaan karaan xeerar ku saabsan inay u ogol yihiin kaliya inay meesha ku noolaan karaan dad jinsi cayiman ah.
- Hadii aad qol ama qolal aad ka kireysato guri uu mulkiilahu ku nool yahay guriga, waxay go'aansan karaan cid laga kireynayo iyadoo la eegayo jinsiga, martabada guur, inaad manfacyada dowlada in kale, dadka qofku la galmoodo, ama naafanimo.

Guryaha hayntu ma ku xulan karaan dadka ay qaadanayaan iyagoo ku salaynaya naafanimo?

Dadka qaarkii waxa ay u maleeyaan in guryaha hayntu ay dadka ay qaadanayaan ay ku xulan karaan naafanimo. Taasi run **ama aha**. Rugaha haynta iyo kuwa gargaarka noloshu waa khasab inay u hogaansamaan sharciyada xaquuqda naafada. Intooda badan guryahay caynkaa ahi waxaa loogu talagalay in ay u adeegaan dadka naafada ah.



Badanaa, daryeel-bixiyeyaasha caynkaa ah cidna ma ay takoori karaan isagoo ku salaysan takoorku nooca naafanimadoodu tahay. Kolkaa hadii qolada guriga leh ama maamulku uu diido codsigaaga, ama ay isku dayaan inay guriga kaa saaraan ama ay kuula dhaqmaan si ka duwan sida dadka kale iyadoo sababtu tahay naafanimadaada, waxa ay jabinayaan sharciga.

Waxyaabahaasi Waxa ay Noqon karaan Calaamado Muujinta Takoorid Guryaha ah oo Sharci-darro ah:

Codsigaaga ma loo diiday naafanimdaada awgeed?

Guriga aad ku jirto ma lagaaga saarayaa naafanimo awgeed?

Tusaale ahaan, ciddi ma kugu tiraahdaa waxyaabaha sida:

- Gurigaa ma aad kiraysan karid. Ma rabo inaan mas'uul ka noqdo hadii ay wax ku gaaraan.
- Guriga aad ku jirto waa aanu kaa saari waayo kaligaa ma ku noolaan kartid.
- Halkan kugulama uu noolaan karo qof ku caawiya ama xayawaanka wehelka ah.

- Waa inaad dhigtaa lacagta dabaajiga xayawaanka yar la isaga qaado hadii ay kula joogaan qof ku gargaara ama xayawaanka wehelku.
- Goobtayada hayntu ma aqbali karto dadka naafadaada oo kale leh.
- Waa khasab inaad guurto. Rugta gargaarida noloshu kama soo bixi karto baahidaada wixii hadda ka dambeya.

Wax ma lagaa waydiiyey awoodaada aad “kaligaa ku noolaan karto”?

Tusaale ahaan, ciddi ma ku waydiisaa wax ka mid su’aalahan soo socda:

- Ma awoodi inaad kaligaa noolaato?
- Ma naafaad tahay?
- Sidee ayey u xun tahay naafadaadu?
- Ma qaadataa dawooyin?
- Waa maxay sababta lagu siiyo manfacyada sooshal sakuuratigu?
- Waxa aan u baahnahayn inaan eego qoraalada dawooyinkaaga.
- Waligaa cisbitaal ma lagu dhigay xanuun dhanka dhimirka ah?



Si ka dwuan sida dadka kale ma laguula dhaqmaa naafanimadaada awgeed?

Ciddi ma kugu tiraahdaa, waxyaabaha sida:

- Waa inaad kaa qaadno kuriga aad ku socoto waayo si quran uma wadi taqaanid.
- Dadka biraha ku socdaa waa inay ku noolaadaan dabakha koowaad.
- Kaliya dadka waaweyn ee sida fiican u dhaqdhaqaaqa ayaa ku noolaan kara guryahaas.
- Wax kuma cuni kartid meesha wax lagu wada cuno waayo naafanimadaada ayey dadka kale dhibsan karaan.
- Dadka isticmaala kursiyada lagu socdaa waxa ay waxa keeni karaan khasaare, kolkaa waa inaad bixisaa labada jibaar lacagta dabaajiga ah ee la iska rabo.

Xayeysiinahu ma himmad-jabiyaan dadka naafada ah?

Tusaale ahaan, warqad xayeysiin ah oo oranaysa waxyaabaha sida:

- Kaliya dadka cagahood ku socon kara uun.
- Sartu waxa ay ku haboon tahay dadka fudud/jir ahaana fayow.
- Looma ogola dadka madaxa ka jirani inay dagaan halkan.

Waxa aad leedahay xaq aad ku Codsan karo Isbedelo Macquul ah: Ladifada Macquulka ah iyo Maciinada Macquulka

Ladifada Macquulka ah

Waxa aad xaq u leedahay inaad codsato in dhismaha goobta aad kiraysato wax laga bedeli hadii aad ugu baahato sabab ah naafanimdaada awgeed. Kuwaa waxaa la yiraa “ladifada macquulka” ah. Isbedeladaasi waxa ay noqon karaan kuwa gurigaaga gudhiisa ama dibadiisa lagu sameeyo – oo ay ku jiraan albaabka weyn ee sarta laga soo galo iyo wiishasha guryaha la degan yahay ku jira.

Tusaale ahaan, waxa dhici karta inaad codsato isbedel guriga gudhiisa lagu sameeyo sida:

- Biraha musqulaha la geliyo ee la qabsado
- Haan-daraabka albaabka oo wax laga bedelo
- Alaabka oo kaabad lagu xiro
- Alaab waasac ah in la helo si uu kursiga lagu socdaa uu mari karo



Waxaa dhici karta inaad bixiso qaar ka mid ah isbedeladaa aan ka ahayn:

- in guriga cidda lehi ay gargaar dhaqaale ka hesho dowladda ama
- in guriga la dhisay ka dib 1991, kolka isbedeladdu ay ahayd inay dhaqangalaan sharciyan.

Haddii aad haysato ka Reebida Medical Assistance, waxa aad codsan kartaa caawimaad si aad u bixiso kharashka wax ka bedelida guriga.

Intooda badan guryaha cusub – ee la dagay ka dib Maarso 1991 – inay lahaadaan heerar fiican oo gelitaanadooda ah waxa dadka fara sharciga kolkaa la sameeyey. Kuwaa waxaa ku jira, wiishka/goobaha la wadaago, alaabada, musqulaha, iyo kijooyinka.

Qolo guri lahi ma oran kartaa Maya hadii aan ka codsado ladifado macquul ah?

Qolada guriga lahi waxa ay diidi karaan codsi ku saabsan ladifad macquul ah hadii kharashka sameynta uu aad u sareeyo oo uu keeni karo culeys maamul ama mid dhaqaale. Sidoo kale waxa ay oran karaan maya hadii ladifida la codsaday ay bedelayso hawl-galada aasaasiga ah ee qolada guriga.

In kastoo ay u oran karaan “maya” sababahaawgood, cidda guriga lahi kuguma colaadin karo waydiisiga wax ka bedelida guriga.

Maciinada macquulka ah

Waxa aad xaq u leedahay inaad codsato isbedelo lagu sameeyo habraacyada iyo xeerarka dhismaha oo dhan hadii aad ugu baahan tahay isbedelada inay kuu ogolaadaan inaad isticmaasho aadna ka faa’iidaysato barnaamijyada iyo adeegyada ay fidiyaan qolada gurigu. Arrintan waxaa loogu yeeraa “*maciinada macquulka ah.*”

Tusaale ahaan:

- codsiga in wax laga bedelo meesha dadku isugu yimaado ee kulanada lagu qabto waayo halkaa ma aad tagi kartid
- codsiga in lagu siiyo meel aad gaariga dhigato oo haboon
- codsiga iyagu inay dib uga fakaraan diidida codsigaaga ama guri ka saaridaada
- inay haysato qof ku gargaara ama xayawaanka wehelka ah
- dib u qawimida adeegyada



Ogow: Qolada gurigu kuuma waydiisan karaan lacag dabaaji ah qofka ku gargaaraya ama xayawaanka wehelka ah awood. Laakin hadii xayawaanku uu khasaare gaysto waxaa dhici karta inaad bixiso kharashka hagaajinta ama wixii kale la soo dalacdo.

Qolo guri lahi ma oran kartaa Maya hadii aan ka codsado maciino macquul ah?

Qolada guriga lehi waa ay diidi kartaa codsi u maciinid ah hadii aadan xaq ugu lahayn naafanimo sida sharcigu dhigayo. (Eeg qaybta labaad ee xogtan aruursan, “Ciddee xaq u leh u aqoonsiga naafanimo?”)

Waxay kaloo oran karaan Maya hadii maciinada aad codsatay aysan shaqo ku lahayn baahi la xiriirta naafanimadaada.

Waxay kaloo oran karaan Maya hadii waxa aad u codsanayso si loo xaliyo dhib jira aysan “macquul” ahayn.

Go’aanka ah in la ansaxiyo ama la diido ladifaadaha ama maciinada waa in kiis walba gaar kiisa loo gaaraa. Waxaa roon in heshiis u dhaxeeya labada dhinac ee kiraystaha iyo qolada guriga la gaaro.

In kastoo ay u oran karaan “maya” sababahaawgood, qoladda gurigu kuguma colaadin karto waydiisiga maciin awgii.



Ogaysiin Gaar ah oo Ku Saabsan Horey u Joojinta Heshiiska (Lease)

Haddii aad u baahan tahay inaad horey uga baxdo heshiiska guriga (lease) iyadoo sababtu tahay naafanimadaada awgeed, waxa aad u codsan kartaa arrintan sidii ‘maciin macquul’ ah oo kale.” Tusaale ahaan, haddii sarta aad ku jirtaa aysan lahayn wiish aadana raaci karin jaran-jaradda mar dambe. Tusaale kale waxa uu noqon karaa haddii aad u baahan tahay qalab caafimaad oo gaar ah inaad isticmaasho uusana geli karin qalabkaasi gurigaaga. Qoladda guriga lehi waa inay u tixgelisaa codsigaagga inay horey kuu rarto ah si la mid ah sidda codsiga ‘maciinka macquulka ah.”

Laga bilaabo bisha Janaayo 1, 2024, qaar ka mid ah kiraystaasha Minnesota waxay xaq u leeyihiin inay u guuraan rug lagu siiyo daryeel caafimaad. Sharcigu waxa uu u baahan yahay in 60 cisho oo ogaysiis ah la siiyo qoladda guriga, laga keeno cadeyn dhaqtar, iyo cadeyn ah inaad codsatay ama laguu ogolaaday inaad gasho rug daryeel caafimaad aad ku heli.

Caawimaadaha kale

La xiriir xafiiska Gargaarka dhanka Sharciyada (Legal Aid) ee 1-(877) 696-6529 ee deegaankaaga hadii aad dareensan tahay inaad tahay dhibane loo geystay takoor guryaha ah aadna doonayso inaad fahamto xaquuqdaada. Adeegani waa *mid bilaash u ah ciddii xaq u yeelata*.

Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta:

www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Waxaad kaloo wici kartaa ama aad u tagi kartaa:

MN Department of Human Rights

Waaxda Xaquuqda Aadanaha ee MN

Griggs Midway Building
540 Fairview Ave North, Suite 201
St. Paul, Minnesota 55104

Telefan: (651) 539-1100 ama 1(800) 657-3704
MN Relay: 711 ama 1(800) 627-3529

Khadka ka gargaarka takoorka (helpline): 1-(833) 454-0148

limaylka ah: info.mdhr@state.mn.us shabakada (website) ah: www.mn.gov/mdhr/

Housing and Urban Development (HUD)

Wasaarada Horumarinta Guriyeynta iyo Baladyada

Minneapolis Field Office
212 Third Ave South, Suite 150
Minneapolis MN 55401

Telefan: (612) 370-3000
TTY: 7-1-1

Housing and Urban Development (HUD)

Wasaarada Horumarinta Guriyeynta iyo Baladyada

Chicago Regional Office of FHEO
77 West Jackson Boulevard, Suite 2202
Chicago, IL 60604-3507

Telefan: (312) 353-6236
TTY: (312) 353-7143

www.hud.gov

Waxa aad ku soo gudbisan karaa ashtako shabakada (website) hay'ada HUD ee ah www.hud.gov ama waxaa aad warqad u diri kartaa xafiiska Chicago ee kor ku xusan.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.